# Maamulka Hantidaaada Adiga Oo Nool

Living Trusts

## Maxay tahay mamulka hantida adiga oo nool?

Maaamulka hantida waa dariiqo oo lagu maamulo hantidaada ma guurtada ah. Waxaad ka helaysaa faa'ido buuxda inta aad noshahay, iyada oo "qofka aad ku aamineyso" maareyn karo geeridaada ka dib. Haddii si wanaagsan loo maalgeliyo, waxa uu maamulka hantida kuu ogolaanayaa in hantidaas u wareegto qoyskaaga aad jeceshahay (ama samafal) marka aad geeriyooto iyadoo aan maxkamadaha dhaxalka.



Maamulka hantida waxaa la furaa adiga oo nool. Qaybo gaar ah oo ka mid ah hantidaada maguurtada ah ayaa lagu wareejiyaa xisaabta adiga oo weli nool. Marka aad geeriyooto ka dib, hantida maguurtada ah waxaa lagu wareejiyaa dadka dhaxalkaaga is leh iyadoo aan maxkamad maamulka ahntida aysan soo dhex gelin.

Xusuusnow, maamulka hantidu waxa uu khuseeyaa oo kaliya hantida ka diiwaan gashan oo keliya. " Xisaabta Hantida Dardaaranka" waa in ay markasta la socotaa xisaabta maamulka hantida. Xisaabta hantida dardaaranka waa dukumeenti sharci ah oo xaqiijinaysa in hantidaada soo hartay si toos ah loogu wareejiyo xisaabta maamulka hantida ee aad adigu samamysay. Haddii la sameeyo xisaabta hantida dardaaranka ah, weli waxaa loo baahanyahay dardaaranka hantida ee maxkamadu maamusho. Haddii dardaaranka hantidaaddu ay tooska u aadayso amaaneynta la cuskado, waxaa dhici karta inaad u baahato maxkamad.

## Waxaa jiraa 2 nooc ee Xisaabta maamulka Hantida

- Xisaabta Maamulka Hantida ee aan laga noqon Karin **lama bedeli karo** lama joojin karo marka la saxiixiay ka dib.

- Hisaabta Maamulka Hantida ee laga noqon karo waa la bedeli karaa waana la xiri karaa markii la doono, inta aad adigu karti iyo awood leedahay.

## Maxaa la iga doonayaa inta aanan asaasin xisaabta maamulka hantida?

**Mar kasta waxaa wanaagsan in aad la hadasho garyaqaan,** oo kaa caawimi kara go'aanka in asaasida xisaabtaan ay adiga kuu wanaagsantahay. Haddii aad goosato in aad asaasto Xisaabta Maamulka Hantida, garyaqaanku wuxuu kula qorayaa waraaqaha si loo xaqiijiyo in ay waafaqsan tahay waxa dantaada ah. Garyaqaanku wuxuu kaa caawimayaa in hantidaada ma guurtada ah aad ku dartid xisaabta maamulka hantida. Foomka ah in wax kasta meel lagu soo ururiyo adiga waxba kuma tarayo.

## Maxaan yeelayaa haddii aan doonayo in aan furto xisaabo isku dhaf oo ay ka mid tahay tan Maamulka Hantida oo wada socota?

Ka feejignow qofkasta ee kugu cadaadinaya in aad iibsato xisaab wada socota ee lagu maamulayo hantidaada. Ha la xaajoon qof kasta oo raba in aad wax saxiixdo isla markaaba, ama raba in aad lacag bixiso adiga aan helin fursad badan oo aad baaritaan ku soo samayso. Shirkadaha qaarkood waxay rabaan qorshe isku xiran oo aay diyaariyeen in ay kaa gadaan. Shaqadooda ma aha sida qorshahaasi uu u buuxin karo baahidaada. **Hadii "buuxi foomamka oo fur xisaabta" aan si wanaagsan loo samayn, waxaa laga yaabaa in ay dhibaato keento, oo kharaj badan ku kacdo si loo hagaajiyo.**



In kastoo ay suurtagal tahay inaad adigu kaligaa sameysto maamul hanti inta la nool yahay ah oo aasaasi ah hadana **waa ay adag tahay sameynta arrintaasi la'aanta caawimaada qareeni**. Qareenku waxa uu eegi xaaladaadda waxa uuna kuu sharxi karaa wax walba adiga. Haddii aadan lahayn hanti badan, aadana isku dayeyn inaad xadido helida lacagta ah ee aad qof uga tagayso, amaaneyntu waxaa dhici karta inaysan adiga macne kuu lahayn.

## Marka side u shaqaysaa?

Billowgu, waxaad samaysaa ama asaastaa xisaabta maamulka adoo saxiixaya heshiiska. Heshiiskaas waxa saxiixaya:

- Qofka lacagtiisa iyo hantidiisa ma guurtada ah ay maamulayso xisaabtaas ( heshiis gale – adiga) iyo

- Cidda maamulaysa xisaabta hantida la geliyay ( qofka/hay'ada maamulaysa)



Qofka/hay'ada maamulaysa waa in uu raacaa tilmaamaha aad ku qortay waraaqaha. qofka/hay'ada maamulaysa waa in uu sidoo kale uu raacaa sharciga lagu maamulo xisaabta hantida ma guurtada ah.

Markaas waxaad ku wareejinaysaa hantida aad leedahay in ay maamusho/maamulaan xisaabta maamulka hantida. Dadka macaash ka helaya hantida xilliga iyo geerida ka dib waxaa loo yaqaan *Dhaxal sugayaal*. Addiga ayaa macaash ka helaya hantida oo ah dhaxal suge inta aad nooshahay.

Dadka qaarkiis waxay jecelyihiin xisaabta maamulka hantida inta ay noolyihiin si ay isaga ilaaliyaan in ay ka tagaan dardaaran ay maxkamadu maamusho marka ay geeriyoodaan. Taxadar! Maamulka hantidu waa mid jaah-wareer leh qaalina ah. Si taxadar leh uga fakar helna talo dhanka sharciga ah. Waxaa jira siyaabo badan oo la isaga ilaalin karo mudaca maxkamada dhaxalka.

## Maxay kala yihiin heshiis gale, qof/hay'ad maamul, iyo dhaxal suge

Marka laga hadlayo xisaabta mamulka hantida, heshiis gale waa adiga, qof/hay'ad maamul waa adiga, dhaxal suge waa adiga. Taas micneheedu waa hantidaada, adiga ayaana maamulaya inta aad nooshahay. Marka aad geeriyooto, hantidu waxay u wareegaysaa dhaxal sugayaasha ee aad ku qortay xisaabta.

**Fiiro gaar ah:** Khasab ma aha in aad tahay qof/hay'ad maamul hanti. qofka/hay'adda maamul hanti wuxuu noqon karaa qof kale ama shirkad maaliyadeed sida bangiga. Waa in aad magacowdaa cid kale oo qof/hay'ad maamul hanti ah oo ku bedela marka aadan adigu xisaabta mamuli kari weydo iyo marka aad geeriyooto. Haddii aadan magacaabin qof kale ee kaala wareega, markaas maxkamadda ayaa soo dhexgelaysa – taasi waxaa ku baxa kharja fara badan, waxayna noqon kartaa wax aadan rabin in ay dhacdo!

## Qof nool maka maarmi karaa in maxkamaddu maamusho dhaxalka?

Haa. Tani waxay ka mid taahy faa'iidooyinka waaweyn ee ay leedahay xisaabta maamaulka hantida. Marka aad geeriyooto kadib, qof/hay'ad maamusha hanti, ama ku xigeenkooda koowaad waxay bixin karaan hantida ku jirta xisaabta oo ay siinayaa dadka iska leh dhaxalka iyadoo aan loo baahan maxkamad. Tani waxaa lagaga maarmaya kharajka iyo dib u dhaca ka yimaada dhaxalka maxamaddu maamusho. Sidoo kale isticmaalka xisaabtan waa wax gaar loo leeyahay, lamana mid aha dhaxalka ay maxkamadu maamusho oo dadweynuhu leeyhiin oo qof kasta arki karo.

Fiiri xogta urursan, *Su'aalaha Ku Saabsan Dhaxalka*.

## Ma jiraan siyoobo kale oo aad isaga ilaalisid in maxkamad maamusho dhaxalka?

Haa. Waxaa jira tusaalooyin:

- Haddii laba qof ay wada leeyihiin hanti ma guurta ah sida **mulkiyad la wadaago**, inta badan tan laguma samayn karo dhaxal maxkamad maamusho. Marka qof geeriyooda, hantida waxaa si toos ah u yeelananya qofka nool.

- Looma baahna dhaxal maxkamad maamusho haddii qofku **magacaabo cidda dhaxlaysa**. Tusaale, cayminta nolosha lacagtu waxay si toos ah ay u aadaysaa ka dhaxal sugaha la magacaabay iyadoo aan loo dirayn maamulka dhaxalka ee maxkamada. Sidaa oo kale waxaa sameeya xisaabta bangiga iyo xisaabaha lacagta hawlgabka ah haddii dhaxal-suge la magacaabay.



- Waxaad u isticmaali kartaan u wareejinta hantida aad ka geeriyootay, halkii ay ka aadi lahayd maxmamad maamulka dhaxalka oo gurigaaga siin lahaa qof kale. Fiiri xogta urursan *Wareejinta Hantida Geerida Ka Dib*.

## Xisaabta maamulka hantida ma i caawimi kartaa haddii aanan maamuli Karin hantidayda ma guurtada ah?

Haddii xisaabtaas la sameeyay adiga oo karti iyo awood leh, qof/hay'ad maamul hanti ayaa kuu maamuli kara hantidaada haddii aad noqoto qof aan go'aan isu


gaari karin. Hantida waa in laguugu maamulayaa sida ugu wanaagsan ee dantaadu ku jirto intaad nooshahay.

**MUHIIM:** Haddii aad leedahay hanti aan la amaaneynin, waxa aad u baahan inaad lahaato wakiil idman si arrintaa loo maareeyo inta aad nooshahay. Tusaale IRA laguma dari karo xisaabtaas. Markasta waa in IRA ay magacaaga ku qorantahay. Fiiri *Wakiil Ka Noqosho Si Sharci Ah*.

## Keebaa kharaj badan ma xisaabta maamulka hantida mise dardaaran?

Haddii aad qof lacag ku siinayso xisaabta maamulka hantida si ay kuu caawiyaan, dhab ahaantii way ka kharja badantahay in aad qorto dardaaran.

- Madaama xisaabta maamulka hantida ay tahay wax dhib badan, qareenks diyarinaya kharaj badan ayuu qaadanayaa in uu diyaariyo xisaabtaas marka loo eego dardaaranka.



- Xisaabta maamulka hantida waxay shaqaysaa marka aad hanti ku wareejisid. Inta badan waxaad u baahantahay garyaqaan marka aad samayneyso wareejinta, gaar ahaan haddii aad wareejinayso hanti ma guurto ah.

- Haddii xisaabta maamulka hantida ay tahay shirkad maaliyadeed, waxay ku saaraysaa kharajka maamulka.

Haddii aadan ka maarmi karin maxkamadda dhaxalka, aadna hanti badan leedahay, waxaa laga yaabaa inay kuu raqiisan tahay inaad lahaato amaaneyn intii aad lahaan lahayd dardaaran. Sababta taasina waa dardaaranku inta badan waa inuu maro nidaamka maxkamadda dhaxalka.

**Su'aasha dhabta ah in laga jawaabo waxa ay tahay:** Kee baa adiga kharaj badan, ma xisaabta maamulka hantida mise dhaxalka hantida ma guurtada ah ee ay maxkamadu maamusho? Arrintani waxa ay ku xiran tahhay xaaladaadda kuu gaarka ah, kolkaa waa wax macne sameynaya inaad kala tashato qareen.

Fiiri xogta urursan, *Su'aalaha Inta Badan La iska Waydiiyo Dardaaranka.*

## Ma ii wanaagsantahay in aan yeesho xisaabta maamulka hantida hadii aanan lahayn hanti ma guurto ah ama hanti maaliyadeed oo badan?

Uma badna. Sababta taasina waa hantidda dhaqaale waxa kuu maamuli kara adigoo nool wakiilkaaga idman. Waxaana la siin karaa cidda aad rabto ka dib geeridaadda adigoo u magacaabaya inay dhaxlaan lacagta akoonadaadda ku jirta iyo hantidaadda maguurtadda ah.

Laakiin mar marka qaar, waxaa jiri kara sabab wanaagsan oo aad u rabto in ay maamusho xisaabta maamulka hantida. Tusaale wanaagsan waxaa ah haddii ay jiraan dad badan oo aad doonayso in ay hantidaada qaataan marka aad geeriyootid. Waxaa dhici karta inaadan awoodin inaad ku sameyso arrintan wareejin hantida dhulka geerida ka dib ama u magaacid dhaxal-suge xisaabtaada bangiga.

## Xisaabta la aaminay ee maamulka hantida ma ilaalinayaan hantidayda haddii aan galo guryaha xanaanaynta dadka waaweyn ama aan u baahnahay guri daryeel?

Sidda qaalibka ah, maya. Haddii aad codsato gargaar caafimaad in ay kaa bixiyaan daryeel waqti dheer qaata, gobolku wuxuu ka dhigayaa hantida ku jirta xisaabtaaas hanti u diyaar ah. Taas micneheedu waxa weeye waa hanti aad u isticmaali karto in aad ku bixiso daryeelkaaga. Waa in aad isticmaashaa hantidaas si aad ugu bixiso faa'iidooyinka ay ka mid tahay gargaarka caafimaadka (MA). Dhibaatooyinka oo kale waa sababaha loogu baahanyahay in aad la xiriirto garyaqaan haddii xisaabta maamulka hantidu uu micne kuu samaynayo.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**